



Qiimeynta Akhriska iyo Xisaabta ee Sanadka oo Dhan ee Maine ee 2024-25

Waalidka/Masuulka Qaaliga ah,

Sanad dugsyeedkan, ardayda Maine ee ay dawladdu kharashka ka bixiso ee ku jira fasallada 3 illaa 8 iyo sanadka 2^{aad} ee dugsiga sare waxa ay ka qaybqaadan doonaan [Qiimeynta Sanadka oo Dhan ee Maine](#) dayrta iyo gu'ga. Qiimeynta Sanadka oo Dhan ee Maine waxa ay diiradda saartaa filashooyinka heerka fasalka ee muhiimka ah ee akhriska iyo xisaabta. Macallimiintu waxa ay u adeegsadaan natiijooyinka laga helo qiimeyntan si ay uga dhigaan macluumaad ay u kaashadaan waxdhigista, taageerooyin ugu hirgeliyaan ardayda, oo ugu la wadaagaan macluumaadka ku saabsan guusha tacliineed qoysaska.

Dugsiyadu waxa ay ka doortaan taariikhaha imtixaan qaadista gudahooda muddooyin imtixaan qadis oo lix-toddobaad ah:

- Dayrta 2024 (Waajib): Sibtambar 16 illaa Oktoobar 25
- Jiilaalka 2025 (Ikhtiyaari): Janaayo 6 illaa Febraayo 14
- Gu'ga 2025 (Waajib): Abriil 14 illaa Maajo 30

Qaybaha muhiimka ah ee ay ka kooban tahay Qiimaynta Sanadka oo Dhan ee Maine waxa kamid ah waxyaabaha soo socda:

- Qiimeyntu waa **mid adkaanteedu la kordhayso jawaabaha ardayga**. Kadib marka uu jawaab saxo, ardaygu waxa uu u gudbi karaa su'aal kasii adag. Kadib marka uu jawaab khaldo, ardaygu waxa uu u gudbi karaa su'aal kasii fudud. Natiijo ahaan, qiimeyntu waa mid lagu sargooyey ardayga waana mid gaar u ah arday walba.
- Qiimeynta waxa loo qorsheeyey inay noqoto **mid aan wakhti ku xidhneyn**. Ardayda waa in la siiyo inta wakhti ah ee ay u baahan yihiin si ay uga jawaabaan dhammaan su'aalaha qiimeynta.
- Qiimeyntu waxa ay fursad u siisaa macallimiinta inay galaangal u helaan isla markaana adeegsadaan **xog diyaar ah, oo la dabbiqi karo** si ay ugu qorsheeyaan waxdhigista. Dugsiyadu waxa ay xogta qiimeynta ku helaan muddo 72 saacadood ah gudahood.
- Qiimeynada deyrtu, jiilaalka (ikhtiyaari), iyo gu'ga waxa loo adeegsan karaa hal qaab oo lagu **cabbiro koboca ardayga** muddo kadib. Qiimeynta gu'ga waxa loo adeegsan karaa hal qaab oo lagu **cabbiro waxqabadka ardayga iyada oo loo eegayo halbeegyada gobolka ee heer-fasal**. Si loo abuurto fahan sii dhamaystiran oo ah waxa ardaygaagu garanayo ee uu qaban karo, natiijooyinka laga helo Qiimeynta Sanadka oo Dhan ee Maine waa in lala adeegsado khayraad dheeraad ah, sida qiimeynada dugsiga iyo waxbarashada fasalka.
- Taageerooyin arday iyo **adeegyo awood galaangal helineed** oo kala duwan ayaa ay heli karaan ardaydu si loo xaqiijiyo in khibrada qiimeyntu ay illaa xad waafaqsan tahay waxdhigista maalinlaha ah ee ardayga. Adeegyadan awoodda galaangal helineed waxa kamid ah, balse aan ku xaddidneyn, taageerooyin iyo fudaydino loogu talagalay ardayda leh qorshayaasha taageero, Qorsheyaasha Barashada Luuqadda ee Shakhsiyeed, Qorsheyaasha 504, iyo IEP yada.

Si aad macluumaad dheeraad ah uga hesho Qiimeynta Sanadka oo Dhan ee Maine, fadlan waxa aad la xidhiidhaa macallinka ama maamulaha dugsiga ardaygaaga.